

Gudniinka gabdhaha Waalidkey ma oggola

Qofkii fuliya ama fasaxa gudniinka gabdhaha waa eedeysane.
Sidaa awgeed:

- Ma bannaana inaad fal gudniin ah caawintid
- Ma bannaana inaad fal gudniin ah fursad siisid
- Ma bannana inaad tashiilaad ama maagalin u sameysid fal gudniin ah
- Ma bannaana inaad horseedid fal gudniin

Dalkan Nederland gudniinka gabdhaha waa fal dambiyeed, waayo ilmo walba wuxuu xaq u leeyahay badbaadin iyo caafimaad. Gudniinku wuxuu dhibaateeyaa caafimaadka gabadha.

Wixii macluumaad ah waxaad kala soo xiriiri kartaa:
Hay'adda Pharos (focalpoint), wixii su'aal ah maalmaha shaqada saacadda: 9.00-13.00 ,Telefoon: 030-2349800
e.mail: focalpointmeisjesbesnijdenis@pharos.nl
Ururka FSAN: Wixii su'aal ah, saacadda 11.00-16.00
Maalmaha: Isniinta, talada iyo Khamiista
Telefoon: 020-4861628
e-mail: info@fsan.nl ama z.naleie@fsan.nl

Hadaad u sii baahatid su'aal arrintaan ah la xiriir:



Markaad xarunta “Consultatiebureau” ama tan “GGD” wada-hadal ku saabsan gudniinka gabdhaha kula yeelatay dhakhtar ama kaaliye caafimaad ka socda kooxda daryeelka caafimaadka carrurta (het jeugdgezondheidszorg team), waxaa lagu siinayaa folderkan oo ku qoran luqadaada, si aad tartiibtaada u akhrisatid kalana hadli kartid qoyskaaga, qaraabadaada iyo saaxiibadaa.

Caalamka ilaa hadda waxaa la gaday in ka badan 130 malyuun oo hablo iyo haween ah. Gudniinka gabdhaha waxaa laga isticmaalaa 28 waddan oo Afrikaan ah. Waxaa kaloo isticmaala Dadweyne kale oo ku nool wadamada Aasiya iyo bariga dhexe. Tusaal ahaan: Soomaliya, Jabuuti iyo waqooyiga Sudaan inta badan gabdhahooda waa la gudaas sida qaalibka ahna waa la qodbaa. Noocan waxaa loo yaqaan Fircooni. Gabdhaha markey yaryihiin ayaa la gudaas. Da’da gudniinka wadamada wey ku kala duwanyihiin laakiin qiyaasta inta badan gabdhaha waxaa la gudaas caadada kowaad ka hor. Sababo badan ayaa loo nisbeeyaa in gabdhaha la gudo sida: dhaqan iyo hiddo-raac/caado, dhawrida bikranimada, waasicinta fursadda gurka, ilaalinta sumcada/magaca iyo dhinaca caqiidada.

WHO waxay ku talisay in gudniinka gabdhaha aan innaba qof dhakhtar caafimaad ah fulin ama goob caafimaad sida isbitaal lagu qaban.

Adduunka oo dhan waxaa la yiraa gudniinka gabdhaha **Maya**. Waxaana si xoogan looga shaqeeyey joojintiisa.

HA OGGOLAAN GUDNIINKA GABDHAADA WAAYO:

- Waa xanuun iyo xafaf badan
- Waa fal naxdin badan
- Wuxuu sababi karaa dhiig-bax saaid ah
- Wuxuu keenaa caalir iyo hurgun
- Geeri ayuu sababi karaa
- Dhalmo la’aan la xiriirta hurgunka ayuu sababi karaa
- Galmada ayuu dhibaateeyaa xilliga aqal-galka
- Waa dhibaateeyaa hooyada xilliga foosha
- Wuxuu sababaa xanuun raagay oo moxogga ah
- Kaadi-mareenka ayuu ciladeeyaa
- Xanuun dhinaca caadada
- Diinta Islaamka iyo tan masiixiga midna ma jideyn gudniinka gabdhaha

Gudniinka gabdhaha waa ka mamnuuc sharci ahaan dalka Nederland

XEERKA NEDERLAND

Laga soo billaabo 1993 waa laga mamnuucay Nederland sharci ahaan gudniinka gabdhaha, ha ahaado nooc kasta oo ka mid ah kuwa soo socda:

- Sunnada Khafiifka, waa sarid ama ka dhiigin xubinta
- Sunna kabiir, waa jarid xubinta
- Kinter-goyn, waxaa la jaraa kinterka, iyo qayb ama dhamaan bishimaha yar-yar
- Fircooniga/qodbid, Waxaa la gooyaa dhamaan xubinta dareenka, bishimaha yar-yar iyo qayb ka mid ah bishimaha waaweyn, ka dibna dhinacyada xubinta dhaawacan ayaa la isku tolaa.